

Guddiga Qaranka ee Xiriirrada Shaqaalaha



Adiga iyo  
Xaalado Wakiilasho



Qoraalkan waxuu caddeynayaa waxay tahay Guddiga Qaran ee Xiriirada Shaqaalaha (NLRB) iyo waxay qabato marka la dalbayo matalaad. Haddaad doonayso mustaqbalka macluumaad dheeraad ah, oo la xiriira xafiiska soo dhaweynta Guddiga NLRB oo kuugu dhow.

---

**Maxay tahay Guddiga Qaranka ee Xiriirada Shaqaalaha (NLRB)?**

---

Waxaan nahay hay'ad dhexe oo loo aasaasay inay meelmariso Xeerka Qaranka ee Xiriirada Shaqaalaha (National Labor Relations Act, NLRA). Sida hay'ad madax bannaan, ma hoos imaanoo hay'ad kale ee xukuumadda ah – sida Wasaaradda Shaqada.

Baarlamaanka ayaa NLRB siisay awood buuxda inay abaabusho doorashooyin qarsoodi ah si shaqaaluhu ay madax-bannaani wax ugu dooran karaan, markay doonaan, in uu urur-shaqaale ayaga matalo markii xuquuqdooda loo gorgortamayo. Doorasho qarsoodi ah waxaa la samayn karaa keliya haddii la soo codsado. Codsigaas waxaa loo soo gudbinayaa Xafiiska Gobolka oo ku yaal aagga ay ku sugan yihiin unugga shaqaalaha. Dhammaan Xafiisyada Goboka waxay bixiyaan , kharash la'aan, qaababka lagu codsan karo doorashada.

**Nocyada Codsiga**

---

1) *Caddayn matalaad (certification of Representation, RC)*

Codsigan, oo inta badan ay soo gudbiyaan ururrada shaqaalaha, waxaa lagu weydiistaa in la qabto doorasho lagu xaqiijinayo haddii ay doonayaan inuu danahooda gorgortanka shaqada uu matalo urur-shaqaale. Waa in codsigaas ay saxiix ku taageraan 30% ama ka badan unugga shaqaalaha oo la matalayo. Saxiixyadaas waxaa lagu muujinayaa hal waraaq. Inta badan, "danta laga doonayo" waxaa ku cad oraah qeexaysa in ay shaqaalahu doonayaan in urur-shaqaale uu wadajir u matalo u gorgortanka danahooda shaqada la xiriira.

Muujinta danta la doonayo waa in shaqaale kastaa saxiixaa, isla markaana taariikh u yeelaa saxiixa.

2) *Ka- noqosho matalaad (Decertification, RD)*

Codsigan, oo uu hal qof soo gudbin karo, waxaa lagu weydiistaa in la qabto doorasho lagu xaqiijinayo in urur-shaqaale uu sii matali karo arrimahooda gorgortanka shaqada. Waa in codsigaas ay saxiix ku taageeraan 30% ama ka badan unugga shaqaalaha

oo la matalayo . Saxiixyadaas waxaa lagu muujin karaa kaarar gooni gooni ah ama waraaq si wadajir ah loo wada saxiixay. Inta badan “danta la doonayo” waxaa ku cad oraah qeexaysa in shaqaalaha aysan doonayn in urur-shaqaale uu wadajir u matalo u gorgortanka danahooda shaqada la xiriira. Muujinta danta la doonayo waa in shaqaale kastaa saxiixaa, isla markaana uu taariikhda ku saxiixa warqadaas.

3) *Ka-bixid Awood–Amni ee urur-shaqaale (Withdrawal of Union-Security Authority, UD)*

Codsigan, oo uu hal qof soo gudbin karo, waxaa lagu weydiistaa in la qabto doorasho lagu xaqiijinayo inuu sii socdo heshiish horay loola galay urur-shaqaale oo waajibinaya in shaqaale kastaa sharci ahaan u bixiyo kharash magacaaban suu shaqada u haysto. Waa in codsigaas ay saxiix ku taageraan 30% ama ka badan unugga shaqaale oo horay heshiiskaas ugu jiray. Saxiixyadaas waxaa lagu muujin karaa kaarar gooni gooni ah ama waraaq si wadajir ah loo wada saxiixay. Inta badan “danta la doonayo” waxaa ku cad oraah qeexaysa in shaqaalaha aysan doonayn in heshiiska ay la galeen ururka shaqaale ee matalaya uu ku sii jiro qodobka awood-amni ee shaqaalaha ku waajibinaya bixiin kharash si ay shaqada u sii haystaan, Muujinta danta la doonayo waa in shaqaale kastaa saxiixaa, isla markaana taariikh u yeelaa saxiixa.

4) *Codsiga loo-shaqeeyaha (Employer Petition, RM)*

Codsigan waxaa soo gudbiya loo-shaqeeye isagoo ku codsanaya in la qabto doorasho markuu arko in hal urur-shaqale ama ka badan ay ku andacoodaan inay matalayaan shaqaalihisa, amase marka loo-shaqeeyaha u caddaato in ururka hadda shaqaalaha matala uusan haysan oggolashaha shaqaalaha intooda badan. Hadday jirto xaaladdan dambe, loo-shaqeeyuhu waa inuu codsiyiisa ku soo taageero caddaymo “biyo kama dhibcaan ah” oo muujinaya hubnaanta inuusan ururka-shaqaale hadda matalin shaqaalihisa intooda badan.

5) *Unug Sharixid (Unit Clarification, UC)*

Codsigan waxaa lagu dalbaa in la sharraxo ulajeeddada uu leeyahay unug gorgortan oo jira iyadoo, matal ahaan, la qeexayo haddii xil cusub hoos imanayo unuggaas . Codsigaan waxaa soo gudbin kara loo-shaqeeyaha ama urur-shaqaale.

6) *Wax-ka-beddel Hawl-caddayn (Amendment of Certification, AC)*

Ulajeeddada codsigan waa wax-ka-beddelid hawl-caddayn urur-shaqaale oo aan weli dhammaystirmin si loogu muujiyo

xaaladaha beddelmay, sida isbeddel magaca ama xiriirka-sokeeye ee uruka shaqaale.

---

### **Waa maxay Unugga Gorgortanka ?**

---

Unug gorgortan waa koox ka kooban labo shaqaale ama ka badan oo wadaaga “dan isku mid ah” oo si caqli-gal ah ugu midoobi kara hawlaha gorgortanka shaqada la xiriira. Guddiga NLRB waxay masuul ka tahay inay hubiso in doorashada matalaadda loo maamulo si waafaqsan inay ka timid unugga shaqaalaha saxa ah. Unugga waxaa caadi ahaan lagu tilmaamaa nooca shaqada uu qabto ama kala soocidda hawsha shaqaalaha –tusaale ahaan, shaqaalaha wax-soo-saarka iyo dayactirka ama darawallada baabuurta xammuuulka qaada. Mararka qaarkood waxaa dood geli kara tirada qaybaha ka mid noqon kara arrinta gorgortanka unugga, markaas inta unug gorgortanka khuseeynayo waxay noqonayaan inta tilmaantaas hoos yimaada. Tusaale ahaan, ganacsiga tafaariiqda, Guddiga NLRB waxay u baahan kartaa inay qeexo haddii unugga gorgortanka uu ku habboon yahay shaqaalaha hal goob ganacsi ama wada saamaynayo gooba badan. Guud ahaan, habboonaanta unugga waxaa lagu salaynayaa maslaxadda ay wada wadaagaan shaqaalahaasi. Guddiga NLRB waxay tix-gelin kartaa isirro kale sida hadday horay u jirtay wadajir gorgortan iyo doonitaanka shaqaalaha arrinta saamaynayso.

Hadaad xeraysid codsi ka-noqosho matalaad ama ka-bixid awood-amni ee urur-shaqale, unugga gorgortanka oo doorashada kasta laga fulinayo waxuu la mid noqonayaa unugga la aqoonsaday ama la sharciyeeyey. Xaaladahan oo kale waa inaad eegtaa heshiiska jiray siduu u muuqdo unugga jira ee gorgortanka.

---

### **Xoogsatada ka baxsan damaanada Xeerka Qaranka ee Xiriirrada Shaqaalaha (NLRA)**

---

Xeerka NLRA ma wada damaananayo xoogsatada dhammaanteed. Xeerka waxaa si tilmaaman uga baxsan shakhsiyaadka :

- Loo shaqaaleeyey xoogsato beeraley
- Loo shaqaaleeyey adeegga guri qof ama qoys
- Loo shaqaaleeyey waalid ama xaas
- Loo shaqaaleeyey iskiis u madax bannaan
- Loo shaqaaleeyey horjooge
- Loo shaqaaleeyey loo-shaqeeye hoos yimaada Xeerka Shaqaalaha Tarennada (Railway Labor Act), sida tarennada iyo dayaaradaha

- Loo shaqaaleeyey maamullada Dhexe, gobollada ama degaannada
- Loo shaqaaleeyey cid kasta oo aan ahayn loo-shaqeeye sida ku cad Xeerka Qaranka ee Xiriirada shaqaalaha (NLRA)

---

### **Awoodda NLRB**

---

Intaa ka sokow, Guddiga NLRB waxaa u dejisan hab ay raacdo si ay awooddeeda ugu adeegsato loo-shaqeeye. Hab raacaas awoodeed waxuu ku salaysan yahay baaxadda iyo nooca hawsha loo-shaqeeyaha, taasoo hawluhu ku kala duwan yihiin.

Tusaale ahaan, Guddiga NLRB waxay awooddeeda gaarsiisaa ganacsiga tafaariqda oo dakhli-sannadeedkooda gaarsiisan yihiin ugu yaraan \$500.000 isla markaasna ganacsiga badeecadooda gaarsiisan tahay xuduuddada Gobollada.

---

### **Goormaa codsi la xerayn karaa?**

---

Guddiga NLRB waxay dejisay nidaam la xiriira xereynta ama soo gudbinta codsiyada khuseeya shaqaalaha hoos yimaada heshiiska jira. Sida badan, marka la eego nidaamka "joojin-heshiis", haddii wakhtiga heshiiskaas jiray yahay 3 sano ama ka yar, waxaa muddadaas reeban in la qabto doorasho wax ka beddesha heshiiskii jiray. Si kastaba, xaaladahaas oo kale, haddii codsi la xereeyo 60 cisho ka badan laakiin 90 cisho ka yar intuuusan dhamaan wakhtigii heshiiska waxaa la oggolaanayaa codsigaas taasoo sababi karta in doorasho la qabto. Muddadaas gudaheeda oo la xerayn karo codsiyada khuseeya hay'adaha daryeelka caafimaadka waa 90 cisho ka badan laakin ka yar 120 cisho inta aysan dhammaan wakhtiga heshiiska.

Waxaa kale, Guddiga NLRB qaban mayso doorasho unug matalaad-kooxeed haddii horay loo qabtay doorasho sax ah 12kii bilood oo ugu dambeyey. Nidaamkan ma saameynayo, si kastaba, doorashada matalaad (UD) oo la meelmariyay 12 bilood gudahood (RC, RM, RD); sidoo kale ma khuseynayso doorasho matalaad ka-bixid awood-amni ee urur-shaqaale la meelmariyey 12 bilood gudahood.

Haddii doorasho la qabto oo ay NLRB ansixid siiyo urur-shaqaale, ansixiddaasi waxay khasab ahaanaysaa muddo sannad ah. Haddii sannadkaas gudahiisa isla unuggaa shaqaale soo codsadaan qabasho doorasho matalaad codsigaasi yeelan mayo wax tixgelin ah maadaama NLRB horay ansixid u bixisay..

## Maxaad filan kartaa haddaad xerayso codsi?

Sarkaalka Soo-dhaweynta Xafiiska Gobolka ee NLRB oo kuugu sokeeya ayaa kaaga jawaabi kara sua'alahaaga la xiriira codsiga mataaladda kaana gacan siin kara dhammaystirka qaababka codsiga.

Haddii aad soo xeraysid codsi, waa inaad diyaaar la ahaataa inaad noo sheegtid magaca iyo cinwaanka loo-shaqeeyaha iyo urur-shaqale kasta oo arrintu saameynayso. Waxaa intaa dheer, waa inaad tilmaan buuxda ka bixisaa unugga gorgortanka oo codsigani khuseynayo, iyo qiyaas ahaan inta shaqaale oo unuggaas ka mid ah. Waa inaad sidoo kale noo sheegi kartid hadday jiraan urur-shaqale oo ku matala, uru-shaqale kale oo arrinta dan ka yeelan kara, ama heshiis gorgortan-koxeed oo hadda shaqeynaya. Haddaad heli karto waa inaad soo gudbisaa nuqulka heshiis kastoo u dhaxeeya loo-shaqeeyaha iyo urur-shaqaalaha.

Waa inaad cinwaankaga ku muujisaa codsiga isla markaana saxiixdaa. Cid kastoo arrinta khuseeyso waxaa la siinayaa nuqulka codsiga.

Danaynta muujinta taageerada codsiyada Caddayn matalaad (certification of Representation, RC), Ka-noqosho matalaad (Decertification, RD), Ka-bixid Awood-Amni ee urur-shaqale (Withdrawal of Union-Security Authority, UD) amase tixgelin jiritaan xaalad dhab ah ee suurta gelin karta codsiga loo-shaqeeyaha (Employer Petition, RM) waa in lala soo gudbiyaa dalabka ama 48 saac soo gudbinta dalabka kaddib, markay tahay codsiyada RC iyo RD, marna uusan ka dib dhicin maalinta ugu dambaysa ee codsiga la xerayn karo. Haddii aan caddayntaas lagu soo gudbin karin wakhtigeeda, ama NLRB aysan garowsan danaynta muujinta taageerada amase tixgelin xaalad dhab, codsigaas qaddarin yeelan maayo.

Markii codsiga la xereeyo, waxaa arrinta loo xilsaarayaa inuu fuliyo wakiil ka socda NLRB. Haddii Xafiiska Gobolka uu go'aamiyo in codsiga horey loo wado, wakiilka loo xilsaaray waxuu isku deyayaa inuu dhinacyada ka dhex saameyo heshiis ku saabsan unugga ku habboon, inta xaq ahaan ka qayb qaadanaysa doorashada, taariikhda, wakhtiga iyo goobta doorashada.

Haddii dhinacyada ay gaaraan heshiis uu ansaxiyo Maamulaha Xafiiska Gobolka, waxaa la meelmarinayaa doorasho. Haddiise dhinacyada ay gaariwaayaan heshiis, waxaa la wada hor imaanayaa Xafiiska Sarkaalka Gar-Dhegaysiga NLRB. Dhinac kasta waxaa la siinayaa fursad uu ku soo bandhigo wixii caddeyn ah oo saamayn ku leh muranka. Markii doodad muranka la xiro, Agaasiimaha Xafiiska Gobolka amase Guddi ayaa soo saar doonai go'aan lagu qabanayo doorasho ama lagu diidi codsiga. Dhinac kastaa waxuu Xafiiska NLRB ee Waghington, D.C uu u

gudbin karaa dalab uu ku codsanayo ka-cafis go'aanka  
Agaasiimaha Xafiiska Gobolka.

---

**Xafiisyada NLRC**

---

Canaawiinta xafiisyada waxaa laga heli karaa liiska diiwaanka  
taleefannada, hoosta ku xusan ee Guddiga Qaranka ee Xiriirada  
Shaqaalaha dawlada Maraykanka (United States Government-  
National Labor Relations Board.)

Cinwaamka iyo taleefanka xafiiska kuugu dhow waa: